



# Storybooks Canada

[storybookscanada.ca](http://storybookscanada.ca)


Kalaay waxay la hadashaa dhirta

Written by: Ursula Nafula

Illustrated by: Jesse Pietersen

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.




This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International License. <https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



(imageless edition)

✎ Ursula Nafula  
👤 Jesse Pietersen  
📖 Abdi Muse  
🗣️ Somali  
📖 Level 2





Kalaay waxay la hadashaa dhirta




Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano. Magaceeda macnihiisa waa “midda wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.

Kalaay way soo toostaa waxeyna  
lahadashaa geedka liinta ah. "Fadlan  
geedka liinta ahoow, weynoow oo na  
sii liin badan oo bissil."






Kalaay waxay aadaa dugsigi. Jidka  
waxay kula hadashaa cawska.  
“Fadlan caws, weynoow cagaaro oo  
ha qallalin.”





“Liinta weli waa cagaar,” ayay ku  
neef tuurtay Kalaay “Waxaan ku arki  
doonaa berrito geedka liintaw,” ayay  
tidhi Khalaay. “Malaha markaas  
baad ii yeelan doonto midho liin ah  
oo bislaaday!”

Kalaay waxay soo martaa ubaxyo  
duureed. "Fadlan ubaxyo, sii  
magoola, si aan timahayga idiin  
saarto."




Markay kalaay guriga ku laabato,  
waxay booqataa geedka liinta."  
Miyay bislaadeen midhahaada wali?  
Ayeey weydissaa khalaay.





Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa  
geedka dhexda xerada ku yaallo.  
“Fadlan geed, so saar laamo  
waaweyn si aan ugu akhrisano  
hooskaada.”



Kalaay waxay la hadashaa bowdka  
ku wareegsan dugsigeeda. “Fadlan u  
kora si awoodleh oo joojiya  
soogallida dadka xun.”